Trygghetsfonden tsl

# Taageerada Sanduuqa shaqo-sugidda

## – marka aad shaqada ka dhamaato oo aad shaqo la`aan noqoto

Waxaan kaa caawin doonnaa sidii aad shaqo cusub ku heli lahayd, ama aad u bilowdo ganacsi kuu gaar ah ama aad waxbarasho biloowdo. Taageero loogu talagalay dadka u shaqeeya shirkadaha heshiis la galay ururrada shaqaalaha.

Haddii shaqo darro awgeed ay shaqo la`aan kugu dhacdo, ama aad xannuunsato ama u heshiiska shaqalaynta ka dhamaado waxaad caawinaad ka heli kartaa Trygghetsfonden TSL [Sanduuqa shaqo-sugidda] . Taageerada waxay ka kooban tahay in laga caawinno sidii aad shaqo cusub u heli lahayd, waxbarasho bilaabi lahayd ama ganacsi ku gaar ah u bilaabi lahayd.

Waxaa dhici karto in taageerada ay kaa kooban tahay koorsooyin tababar oo gaagaaban, waa haddii ay kordhin doonaan fursadaha helista shaqo cusub. Haddii da`daada ay ka weyn tahay 40 sano, waxaad xaq u yeelan kartaa lacagta loo yaqaan xaqa. Haddii aad go'aansato inaad ka qaybgasho barnaamij tababar oo muddo dheer, waxaad heli kartaa hagitaan xirfadeed iyo mid waxbarasho. Xaaladdaas waxaa dhici karto in taageero-dhaqaaleed lagu siiyo muddada aad wax baraneyso.

Taageerada Sanduuqa shaqo-sugidda ee Sanduuqa shaqo-sugidda TSL lacag la`aan ayaa adiga ku heleysaa. Bogga 3:aad waxaad ka akhrisan kartaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan shuruudaha taageerada.

- Waxaa laguu yeeli doonaa hagaha shaqada oo adiga ku gaar ah, kaasoo si firfircoon kaaga caawin doona raadintaada shaqada - kaa caawini doono xiriiryada iyo qorista CV-ga iyo xitaa ka caawini doono u diyaargaroowga wareysiyada shaqada.

- Sannad kasta waxaan caawinnaa dad tiradooda celcelis ah 15,000 oo qof. Dadka nala soo xiriira 10:kii qof 9:kii kamid ah waxay helaan shaqo cusub oo badanaa la mid ah middii hore ama ka fiican.

# Sida taageerada loo hirgeliyo

## Codsashada taageerada

Haddii shaqo-darro darteed aad shaqo la`aan noqoto, waa in loo shaqeeyahaaga wadajir wakiilka ururrada shaqada ayaa taageerada ku codsan doonaan. Isla nidaamkaas ayaa hirgalo haddii ganacsiga loo-shaqeeyaha u burburo. Haddii jirro darteed aad shaqo la`aan noqoto, ama muddada heshiiskii shaqada dhamaado, xaaladdaas adiga ayaa taageerada codsan karo. Codsiga waxaa had iyo jeer laga soo gudbiyaa Sanduuqa shaqo-sugidda barta internetka tsl.se.

## Khariidaynta kulamada

Kadib markii aan xaqiijino inaad buuxisay shuruudaha u-qalmitaanka, waan kula soo xiriiri doonnaa ballansashada kulanka ugu horeeyo dartiisa waxaad la kulmi doontaa la-taliye ku takhasusay taageerada Sanduuqa shaqo-sugidda oo ka socda Sanduuqa shaqo-sugidda TSL, kaasoo kadib faahfaahin dheeraad oo ku saabsan taageerada ku siin doono.. Kadib wadajir ayaa u sahmin doonaa baahidaada biyo duruufahaaga sidii aan ku caawinno habka ugu wanaagsan ee adiga maslaxad kugu jirto.

## Waxaana lagu yeeli doonaa hagaha shaqada oo adiga ku gaarka ah

Kadib markii aad aqbasho in taageerada la sii wado, waxaa lagu yeeli doonaa hagaha shaqada oo adiga ku gaarka ah kaasoo ku caawini doono, tusaale ahaan, wuxuu ka caawini doonaa shaqo raadsashada, xiriir la yeelashada loo-shaqeeyayaasha iyo sida aad ugu diyaargaroobi karto wareysiyada shaqada. Hagaha wuxuu kaloo ka caawini doonaa sidii xiriir ula yeelan lahayd hay'adaha, sida Adeegga Shaqada Dadweynaha iyo Khasnadda caymiska bulshada.

## Taageerada lagu xoojiyo haddii aad xannuunsato ama ay jirto xaalad-caafimaadeed kale

Kadib markii lagu oggolaado taageerada Sanduuqa shaqo-sugidda, waxaad heli kartaa taageero xooggan oo loogu talagalay dadka xaalad-caafimaadeed la dhiban. Taageerada waxay kaloo ka kooban tahay tallaabooyin dheeraad ah oo kaa caawin doonaan inaad hesho shaqo cusub oo karti-xirfadeedkaaga ku habboon.

## Tababar iyo qiimayn

Waxaa dhici karto in taageerada ay ka kooban tahay tababar muddo gaaban ama hindisaha qiimaynta, waa haddii talaabooyinkaas ay kaalin ka geysan karaan inaad shaqo cusub hesho. Macnaha qiimaynta waxaa weeyaan hubsashada wax aad hore u taqaanay, taasoo dad kale loo iftiimin doono macanaha waa xaaladaha aad cadaymo ama shahaadooyin u haysan "warqad ku qoran" aqoontaada xirfadeed .

## Inaad bilaawdo ganacsi adiga ku gaar ah ama ka qaybgasho barnaamij tababar oo dheer

Haddii aad ku talo jirto inaad ganacsasho bilaawdo waan ka caawini karnaa arrintaas. Haddii arrintaas aad go'aansato oona rabto inaad barnaamij tababar oo muddo dheer qaadanayso ka qaybgasho, waxaad caawinaad ka heli kartaa hagahayaga shaqada iyo waxbarashada. Xaaladdaas waxaa dhici karto inaad xaq u yeelan karto qaadashada maalgelinta waxbarashada ee ardayda ee la qaato muddada shaqo la` aanta oo ay bixiso Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN], iyo sidoo kale deeq waxbarasho oo dheeraad ah oo wadajir ah oo laga helo Sanduuqa shaqo-sugidda TSL.

## Lacagta xaqa loo yaqaano (AGB)

Haddii aad buuxsatay 40 sano oona buuxisay shuruudo kale, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato Lacagta xaqa loo yaqaano. Kani waa kaalmo-dhaqaaleed oo aad laf ahaantaada ka codsan karto Afa Försäkring. Laakin kahor inta aad codsashada aad soo gudbinin waa in loo-shaqeeyahii ugu dambeeyay uu arjiga hoos ka saxiixaa.

# Shuruudaha taageerada lagu heli karo

### Waxaad xaq u leedahay taageerada Sanduuqa shaqo-sugidda TSL

Sidii aad xaq ugu yeelato taageerada Sanduuqa shaqo-sugidda TSL, waa in loo-shaqeeyahii ugu dambeeyay u heshiis la galay Isbahaysiga ururrada shaqaalaha ee dalka Iswiidan, kaasoo loo yaqaano Confederation of Swedish Enterprise and the Swedish Trade Union Confederation (LO). Warbixin ku saabsan waxaad ka akhisan kartaa hittaomstallningsorg.se.

### Hawlgalladayna waxay ku salaysan yihiin xaaladda aad adiga ku sugan tahay

Waad heli kartaa taageerada haddii mid ka mid ah kuwan soo socda uu ku khuseeyo:

- waxaa laga ciribtiray heshiiskii shaqada ama waxaad loo-shaqeeyahaaga kula heshiisay inaad shaqadaada ka tagto maadaama hawllo la`aan ay jirtay
- waxaa laga ciribtiray heshiiskii shaqada ama waxaad loo-shaqeeyahaaga kula heshiisay inaad shaqadaada ka tagto maadaama aad xannuunsatay
- haddii heshiiska shaqo ku qorista ka dhammaaday 1 oktoobar 2022
- haddii loo-shaqeeyahaaga u ganacsiga ku khasaaray

### Haddii 24 bilood ee ugu dambeeyay aad ugu yaraan 12 bilood soo shaqaysay

Laga soo bilaabo maalintii shaqada kugu dambaysay, waa in celceliska iyo ugu yaraan toddobaadkii aad 16 saacadood ka soo shaqaysay, taasoo ku beegan muddo 12 bilood ee 24 bilood ugu dambeeyeen. Waxaa suurtagal noqon karto kordhinta muddada 24 bilood, sida tusaale haddii aad ku qaatay fasaxa waalidiinta, gudashada difaaca qaranka am fasax jirro.

### Haddii aad weli 65 sano buuxsan

Waxaa suurtagal noqon karto qaadashada taageero-dhaqaaleedka ilaa aad 64 sano iyo 11 bilood ka buuxsato.

### Shuruudaha gaar ahaan xiriirka la leh maalgelinta ardayda

Sidii muddada waxbarashada ama tababarka aad xaq ugu yeelato taageerada-dhaqaaleed, waxaa kaloo shuruudaha kamid ah inaad shaqayn jirtay ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii ee 14-kii sano ee ugu dambeeyeen aad ugu yaraan 96 bilood (8 sano) ee la soo dhaafay.

## Ma u baahan tahay warbixin faahfaahsan?

Wixii ku saabsan warbixin faahfaahsan, warar iyo dhiirigelin waxaad ka akhrisan kartaa barta internetka tsl.se. Sidoo kale taageeradayada halkan ayaa ka cosdan kartaa. Wixii su`aallo ah waxaan nalaga soo xiriiri kartaa khadka taleefanka ama e:mail:

**Teleefan** 010-480 91 00 (furan maalmaha shaqada 08.00-17.00)
**E:mail** info@tsl.se

Trygghetsfonden tsl

Ururka shaqaalaha muddada shaqo la` aanta ee Isbahaysiga shirkadaha ganacsateyaasha ee dalka Iswiidan iyo heshiisyada Isbahaysiga ururrada shaqaalaha ee dalka Iswiidan LO